

**OGEYSIISKA DACWAD-DHAGEYSIGA JOOJINTA KAALMADA FOODSHARE
(FOODSHARE ADMINISTRATIVE DISQUALIFICATION HEARING NOTICE)**

Magaca – Qofka		Taariikhdiidii Waraaqda
LAMBARKA AQOONSIGA CARES	Lambarka Kiiska	
Cinwaanka Jidka	Taleefanka	
Magaalada	Gobolka	Lambarka Boostada Xaafadda (Zip)

Wisconsin Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) waxay aaminsan tahay in aad si ulakac ah u jebisay sharciyada Wisconsin FoodShare. Faahfaahin arrintan ku saabsan ka akhriso bogga 2aad. Waa dacwad-dhageysi, oo waxaa la yiraahdaa Dacwad-dhageysiga Joojinta Kaalmada, oo waxaa laguugu ballamiyey si loo eego xaqiiqooyinka iyo si loo go'aamiyo haddii aad si ulakac ah u jebisay sharciga.

Dacwad-dhageysiga wakhtiga lagu qabtay waa:

Taariikhda	Wakhtiga
Goobta/Khadka Taleefanka	

Miyaan u baahanahay in aan ka soo qeybgalo dacwad-dhageysiga?

Dacwad-dhageysigan waxaa caadi ahaan lagu qabtaa khadka taleefanka. Waxaa taariikhda iyo wakhtiga ballanka taleefan kuu soo diraya qof dhageysan doona dacwada oo ka socda Division of Hearings and Appeals (Qeybta Dacwad-dhageysiga iyo Racfaanka).

Haddii uusan sax ahayn lambarka taleefanka lagaa hayo, waa in aad la soo xiriirto Division of Hearings and Appeals (Qeybta Dacwad-dhageysiga iyo Racfaanka) si aad ugu soo sheegto lambarka taleefankaaga. Haddii ay ku heli waayaan Division of Hearings and Appeals (Qeybta Dacwad-dhageysiga iyo Racfaanka), waxaa dhici doonta in go'aanka lagu saleeyo macluumaadka la hayo oo keliya.

Maxaa dhacaya haddii aan wakhtiga ballanta ka jawaabi waayo taleefanka dacwad-dhageysiga?

Waxaad soo codsan kartaa taariikh ah dacwad-dhageysi oo cusub. Haddii ay tahay ilaa 10 maalmood intaan la gaarin taariikhda dacwad-dhageysiga waxaa lagaa rabaa sabab muhiim ah oo dib laguugu dhigo. Si aad u codsato taariikh ah dacwad-dhageysi oo cusub la soo xiriir:

Division of Hearings and Appeals
P.O. Box 7875
Madison, WI 53707-7875

DHAMail@wisconsin.gov
608-266-7709

WAA MAXAY EEDEYMAHA IYO XADGUDUBYADA?

Waxaan la aaminsan yahay in aad si ulakac ah u jebisay sharciyada Wisconsin FoodShare sababtoo ah:

- Waxaad soo gudbisay macluumaad khaldan ama been ah.
- Waxaa kala dhimanaa ama lagaa helay xaqiiqooyin aan jirin.
- Waxaa lagugu helay fal xadgudub ku ah Food Stamp Act (Sharciga Kaalmada Cuntada), Food Stamp Program (Sharciga Bamaamijka Kaarka Cuntada), ama qaanuun kasta oo Wisconsin oo ujeedkiisu yahay, in wax lagu soo bandhigo, in wax lagu soo gudbiyo, in waraaqo lagu helo, in la raaco habraac, ama in laga sii ganacsado manaafacaadka FoodShare ama kaararka QUEST.
- Waxaa lagugu qabtay laba codsi oo aad soo gudbisay oo ah wax khaldan ama ah been-abuur.
- Maxkamad ayaa kugu xukuntay isticmaalid iyo qaadasho ah FoodShare aad u adeegsatay in aad ku iibsato maandooriye, hub, rasaas, ama wax qarxa.
- Maxkamad ayaa kugu xukuntay in aad hab khaldan u isticmaashay FoodShare ka badan \$500.

Xadgudub iyo Caddeyn

Xadgudubka oo kooban:

Caddeynta oo kooban:

Waxaad qaadatay FoodShare aadan u xaq u lahayn taariikhaha hoos ku qoran: laga bilaabo _____ ilaa _____.

Wadarta manaafacaadka aad qaadatay oo aadan xaq u lahayn waa: \$_____.

Waxaad xaq u leedahay Dacwad-dhageysiga Joojinta Kaalmada adigoo hor imaanaya Gobolka Wisconsin oo kuu diidi kara in aad qaadato manaafacaadka FoodShare.

WAA MAXAY XUQUUQAHA YGA DACWAD-DHAGEYSIGA?

Waxaad xaq u leedahay in aad:

- Iska eegto caddeymaha loo isticmaali doono dacwad-dhageysiga, ka hor iyo marka ay socoto dacwad-dhageysiga, oo si bilaash ah ku codso in aad hesho qeybaha ku khuseeya ee kiiska.
- Waa in aad adiga ama qof kale soo bandhigtaan kiiskaaga, sida qareen, saaxiib, qof qaraabo ah, ama qof kale oo bulshada ka mid ah waa in la soo bandhigo kiiskaaga. Waxaad heli kartaa adeeg ah xagga sharciga oo bilaash ah. Wixii faahfaahin ah oo ku saabsan sharciga bilaashka ah, waxaad kala xiriiri kartaa:

Legal Action of Wisconsin
www.legalaction.org
1-855-947-2529

ama

Wisconsin Judicare, Inc.
www.judicare.org
1-800-472-1638

- Ka codso in dib laguugu dhigo dacwad-dhageysiga ilaa 30 maalmood haddii aad u baahan tahay wakhti dheeraad ah oo aad ku diyaarsato kiiskaaga.
 - Haddii dacwad-dhageysiga lagu qabanayo 10 maalmood gudahood, Division of Hearing and Appeals (Qeybta Dacwad-dhageysiga iyo Racfaanka) waa in aad u soo sheegto sababta muhiimka ah si dib laguugu dhigo.
- Keeno markhaatiyadaada.
- Kiiskaaga si xor ah uga dood.
- Wax ka weydii caddeymaha ama dawcada laguugu haysto.
- Keen wax kasta oo caddeyn u ah dacwada-dhageysiga oo kiiskaaga taageeri kara.
- Ka aamus eedeymaha laguugu haysto, sababtoo ah wax kasta oo aad sheegto ama aad saxiixdo adiga ayaa laguugu qabsan karaa oo maxkamad ayaa laguuga aadi karaa.
- Waa in aad hesho koobbi ah habraaca dacwad-dhageysiga ee Wisconsin Department of Health Services (Waaxda Adeegyada Caafimaadka) daabacaad uu tixraaceedu yahay [7CFR § 273.16\(e\)\(2\)\(v\)](#) adigoo la xiriiraya xafiiskooda.

Adiga ama wakiil aad qabsatay ayaa codsan kara ballan aad wakiilka loo xilsaaray kiiska ee hoos ku qoran kala hadli kartaan caddeymaha ka hor dacwad-dhageysiga.

Wakiilka Xafiiska

Taleefanka

MAXAA DHACAYA HADDII DAMBI LA IGU HELO?

Haddii uu qofka dhageysanaya dacwada go'aansado in aad si ula kac ah ugu xadgudubtay sharciga, **isla markaaba waxaa lagaa saarayaa Wisconsin FoodShare muddo gaareysa:**

- Hal sano** marka uu xadgudubku yahay kaagii koowaad.
- Labo sano** marka uu xadgudubku yahay kaagii labaad.
- Laba sano** marka ay kuugu horreyso xukun ah federaalka, gobolka, ama maxkamad deegaan adigoo manaafacaadka u isticmaasho wax ku lug leh iibsashada maandooriyaha.
- 10 sano** marka uu ganaaxa xadgudubka kuu yahay kaagii koowaad ama kii labaad oo ah in aad si ulakac ah laba jeer manaafacaad ugu qaadatay hab khiyaamo ah ama wax aad sheegatay.
- Abaddan** marka uu ganaaxa xadgudubkaagu yahay xukun ay kugu rideen federaal, gobol, ama maxkamad deegaan adigoo manaafacaadka u isticmaalay wax ku lug leh iibsashada hub, rasaas, ama wax qarxa.
- Abaddan** marka ay kuu tahay xukun labaad oo ah federaalka, gobolka, ama maxkamad deegaan adigoo manaafacaadka u isticmaasho wax ku lug leh iibsashada maandooriyaha.
- Abaddan** marka ay danbi kugu soo heleen federaalka, gobolka, ama maxkamad deegaan adigoo manaafacaad si khaldan u isticmaashay oo gaaraya \$500 ama wax ka badan.
- Abaddan** markuu kuu yahay xadgudubkii saddexaad ee nooc kasta oo kor ku qoran.

Dacwad-dhageysigan **kama hor istaagayo** qareenka degmada in uu kugu soo eedeeyo xadgudub ulakac ah oo noqonaya **dacwad ah madani ama ciqaab** ama xafiiska kaalmada ayaad u celineysaa wixii dheeraad ah oo lagaa rabo. Adiga iyo xubnaha kale ee qoyska ee gaaray ama ka weyn 18 jir muddadii aad qaadateen waxa dheeraadka ah waxaad masuul ka tihin in aad soo bixisaan wixii aad ku hesheen sida khaldan.

Hay'adaha gobalka ama deegaanka ee Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah (SNAP) iyo Barnaamijka Cunta Qeybinta ee Indian Reservation (FDPIR), iyo hay'adaha la hawlgala, waa inay soo dhajiyaan Bayaanka Takoor La'aanta ee soo socda:

Haku Soo Dirin Foomka Codsiga Halkan.

Sida waafaqsan sharciga xuquuqaha madaniga ah ee federaalka iyo sharciyada iyo qaynuunada xuquuqaha madaniga ah ee Waaxda Beeraha ee Mareykanka (USDA), hay'adan waxaa ka mamnuuc ah takoorida ku salaysan isirka, midabka, asalka qaran, jinsiga, (oo ay ku jiraan, aqoonsiga jinsiga iyo nooca jinsiga), caqiidada diimeed, naafonimada, da'da, aaminsanaanta siyaasadeed, ama aargoosiga ama aargudashada hawlo hore oo xuquuqaha madaniga ah.

Macluumaadka barnaamijka waxaa lagu heli karaa luuqado aan ahayn Ingiriisiga. Shaqsiyaadka naafada ah ee u baahan qaab kale oo wada xidhiidh si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, Hab qoraaleedka camoolaha, daabicidda farta waaweyn, cajalada maqalka, Luuqadda Dhagoolka ee Maraykanka), waa inay la xidhiidhaan hay'adda (gobalka ama deegaanka) ee ay dheefaha ka codsadeen. Shakhsiyaadka dhagaha la', maqalka ku adag yahay ama hadalka nafo ka ah ayaa la xidhiidhi kara USDA iyaga oo u maraya Federal Relay Service (Adeegga Dadka Dhagaha la' ee Federaalka) ee lambarka (800) 877-8339.

Si loo gudbiyo dacwada takoorka ee barnaamijka, Dacwad-qabaha waa inuu buuxiyo Foomka AD-3027, Foomka Dacwada Takoorka Barnaamijka ee USDA kaas oo onleen ahaan looga heli karo barta: <https://www.fns.usda.gov/sites/default/files/resource-files/ad3027-somali.pdf>, xafiis kasta oo USDA ay leedahay , iyada oo la wacayo (833) 620-1071, ama la qorayo warqad ku socota USDA. Warqadda waa inay leedahay magaca, ciwaanka, lambarka taleefanka ee dacwad-qabaha, iyo sharraxaad qoraal ah oo ku saabsan falka takoorka ah ee la soo eedeeyay oo faahfaahsan si loogu wargaliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqaha Madaniga (ASCR) nooca iyo taariikhda xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee la soo eedeeyay. Foomka AD-3027 ee la buuxiyay ama warqadda waa in lagu diraa;

- (1) **boostada:**
Food and Nutrition Service, USDA
1320 Braddock Place, Room 334
Alexandria, VA 22314; ama
- (2) **fakiska:**
(833)-256-1665 ama (202)-690-7442; ama
- (3) **iimaylka:**
FNSCIVILRIGHTSCOMPLAINTS@usda.gov

Hay'addan waa hay'ad bixisa fursad loo wada siman yahay.

Haku Soo Dirin Foomka Codsiga Halkan.